




Hiraan Region, Hirshabelle

Odorasaynta cimilada oo ku
saleysan bilaha Oktoobar-
Nofeembar-Diisambar (OND)
2020



DORASAYNTA OKTOOBAR-NOFEEMBAR-DIISAMBAR (OND) 2020

- Waxaa la saadaalinaya in uu ku da'o roob ka hooseeya intii caadiga ahayd qaybo ka mid ah woqooyi Galbeed ee magaalada Beletweyn xilliga deyrta ee bilaha Oktoobar ilaa Diisambar.
- Badhtamaha iyo iyo woqooyi bari ee Beletweyn waxay heli doonaan roob caadi ah Qeybaha Bartamaha iyo Waqooyi Bari ee magaalada Beledwayne waxay la kulmi doontaa roobab Caadi ah;
- Waxaa la rajaynayaa in roobku bilawdo inta u dhaxaysa 11ka iyo 31ka Oktoobar.
- La socoshada roobabka wata dayablaха iyo digniinta hore ayaa la soo saari doonaa xilli roobaadkan kolba sida uu xaalku yahay.


TALO BIXINO KU AADDAN WAAXYADA



BEERAHA

Waxaa wasaarada Beeraha lagula talinaya:

- In ay kordhiyaan talo bixinta la xidhiidha fidinta beeraha ee ay ka mid yihiin Gashiga beeraha(Qalabka, midhaha tayada leh, daawooyinka cayayaanka iyo bacriminta si ay beeralayda si fuud ugu helaan waxna u beertaan.
- In ay kala shaqayso hayada cuntada aduunka iyo daneeyayaasha kale tababarka beeralayda ee ka hortaga ayaxa iyo xakayantiisa si beeralayda loogu dhiiri galiyo in ay wax beertaan
- In ay wada shaqayn joogta ah la yeeshaan khabbiirada



HIRAA REGION, HIRSHABELLE

Odorasaynta cimilada oo ku saleysan bilaha Oktoobar-Nofeembar-Diisambar (OND) 2020



beeraha, waxaana lagula talinayaa in ay beertaa midhaha hore u bislaada ee u adkaysta abarta

- In ay kala tashadaan xafiiska beeraha ee degmada arimaha la xidhiidha cudurada ku dahaca midhaha iyo maaryantiisa xilli beereadkan;
- In ay kala tashadaan dawladaha hoose fulinta hawlahaa ilaalinta caradda iyo biyaha ee ay ka midyihiin, weecinta daadadka, berkadaha dhisida naxarada iyo biyo qabatinada yaryar.
- In ay isticmaalaan bacriminta dabiiciga ah ee ay ka mid tahay digada xoolaha si ay u wanaajiso nafaqada carrada.
- Beeralaydu waa in ay si dhaw ula socdaan xaalada ayaxa saxaraha, kana wargaliyaan dawladha ama khabirada beeraha si talaabo ku haboon looga qaado ayaxa saxaraha;
- Wasaarada Beeraha iyo daniyayaasha Horumarka ka shaqeeya waxaa lagula talinayaa in ay si dhaw ula socdaa xaaladaha beeralayda dhaqaalana u raadiyaan si ay cunto qaybin ugu sameeyaan beeralayda markii loo baahdo.



XOOLAHAA

Xoola dhaqato-beeralayda waxa lagu dhiirio galinayaa;

- Waa in ay beertaa calafka xoolaha iyo Cawska ,kaydsadaana marka cawsku soo go'o.
- Waxaa kale oo xoola-dhaqatada lagula talinayaa in ay si dhaw ula shaqeeyaan wasaarada xoolaha si ay u xaqiijiyaan ka hortaga iyo daaweynta xanuuunada xoolaha, kaydinta daawooyinka xoolaha iyo talaalka waktiga ku haboon ee xoolaha;
- In ay ilaaliyaan dhul daaqsimedka iyaga oo dhul daaqsimedka u isticmaalaya si habsami leh;
- In ay iiibiyya waxsoosaarkooda saayidka ahsida caanaha iyo hilibka. Wasaarada Xoolaha iyo dhirta waxaa lagula talinayaa:
- In ay dib u habayn ku sameeyaa ballayada iyo ceelasha biyaha iyo berkada ku yaala dhulka xoola-dhaqatadu degantahay si loo xaqiijiyo in ay biyo helaan;

HIRAAN REGION, HIRSHABELLE

Odorasaynta cimilada oo ku saleysan bilaha Oktoobar-Nofeembar-Diisambar (OND) 2020



- In ay aasaasaan xarumaha lagu daaweyyo xoolaha ayaga oo la kaashanaya daneeyayaasha kale;

- In la kordhiyo wacyigalinta la xidhiidha habsami u daweynta xoolaha.

LA TACAALIDA MASIIBIIYONKA

- Dadka ka ag dhaw meelaha fataahadu soo gaadhayso waxa lagula talinaya in ay digtooni muujiyaan lana socdaan saadaasha iyo arimaha digniinta hore.

ARAR MUHIIM AH

- **Xogta halkan ku xusan waxa laga helay Xafiiska sadaasha hawada ee dawlada soomaliya ee bilaha October, November iyo December.**
- **Saadalintu waa mid ka duushay xaalada jira waxaana dhacda in isbedel ku yimaado;**
- **Xogta la socota talo bixinta waa in loo isticmaalaa iyada oo lala soconaya sadaasha ay soo saari doonto Xafiiska Saadasha wixii isbedel ahna lagu daro; hawada ee SomaliaT**
- **Bulshada waxaa lagula talinaya in ay la socdaa xogaha maalinlaha, toban kii cisho iyo bilaha ah ee uu soo saaro xafiiska saadaasha hawada ee Somalia**

Wixii faahfaahin intaa dheer kala xidhiidh:

Somali Meteorological Service,

TELEPHONE: +252634446546

E-MAIL: abdirashid.jama@hotmail.com

